Ireland

An Roinn Dlí agus Cirt,
Gnóthaí Baile agus Imirce
Department of Justice,
Home Affairs and Migration

EUROPEAN UNION
AGENCY FOR ASYLUM

# WAXA AAD U BAAHAN TAHAY INAAD OGAATO MARKA MARKALE CODSATO ILAALIN CAALAMI AH (CODSI DAMBE)



SOMALI

**Waxaad hadda ku sugan tahay Ireland, kaasoo ah waddan ka tirsan EU+. Waddamada EU+ waa:**

- 27-ka Dowladdood ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czechia, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo
- 4 waddan oo kale: Iceland, Liechtenstein, Norway iyo Switzerland.

## TUSMADA


Waa maxay codsiga dambe? 3

waa maxay habraacu?

- Tallaabada 1: codsigaaga waa in la diwaangaliyaa oo la diraa markale 5
- Talaabada 2: baadhista ka horaysa codsigaaga 9
- Tallaabada 3: badhitaanka codsigaaga ee ku saleysan xaqiiqda ama sababta codsiga 11
- Talaabada 4: go'aanka laga gaadhay codsigaaga 12

Waa maxay xuquuqahaygu? 13

Waa maxay waajibaadkaygu? 17

Waa maxay cawaaqibka ka dhalan kara haddii aanan kasoo bixin waajibaadkayga? 23

Waxaad heli kartaa taageero gaar ah haddii aad u baahato 23

Maxaa dhici doona haddii aad rabto inaad ku laabato wadankaaga? 24

## WAA MAXAY CODSIGA DAMBE?

**Waxaad codsan kartaa ilaalin caalami ah (sidoo kale waxa loo yaqaan magangalyo) oo ah markii labaad ama ka badan ee dal kasta oo EU+ ah, codsigaaga cusub waxaa loo yaqaanaa codsi dambe.**

Codsigaaga cusub waa codsi dambe, xitaa haddii codsigaagii hore lagu sameeyay dal kale oo EU+ ah.

Codsiga dambe ma aha racfaanka go'aankii hore ee laguu soo saaray. Waxaad samayn kartaa codsi dambe kaliya marka habraaca codsigaagii hore uu dhamaado. Tani waxay la macno tahay:

- waxaad marka horeba heshay go'aan ku saabsan codsigaagii hore
- ma jiro wax racfaan ah oo socdaa, oo
- wakhtigii la diri lahaa racfaankuna wuu dhacay.

Kaliya ka soo horjeedidda go'aankii hore ma aha sabab lagu codsado ilaalinta caalamiga ah mar kale.

Haddii aad samayso codsi dambe, waa inaad soo bandhigtaa **waxyaabo cusub (sida caddeymo ama dhukumentiyo)** taageeraya sheegashadaada inaad u baahan tahay ilaalinta caalamiga ah.



**Waxyaabaha cusub** waa waxyaabo taageeraya sheegashadaada ilaalin caalami ah oo aanad awoodin inaad soo bandhigto intii lagu jiray codsigaagii hore (ama codsiyadii hore).



Waxyaabaha cusub waxay noqon karaan dhukumantiyo ama caddaymo cusub oo aad heshay, ama dhacdooyin dhacay ka dib taariikhda go’aankii codsigaagii hore, tusaale ahaan:

- dhacdooyin cusub oo kugu dhacay adiga
- dhacdooyin cusub oo ka dhacay wadankaaga hooyo
- Isbaddeladada shaqsiyeed ee kugu dhacay.

**Si gaar ah, waxyaabaha cusub sidoo kale waxay noqon karaan kuwo jiray xilligii aad gudbinaysay codsigaagii hore, haddii mid ka mid ah sababahan soo socda uu khuseeyo.**

- Suurogal kuumay ahayn inaad ogaato waxyaabahan cusub wakhtigii aad samaynaysay codsigii hore.
- Sabab macquul ah, oo aanad kaga hadli karin waxyaabaha cusub. Arrintan marka la eego, waxaad u baahan doontaa sharaxaada sababahan.

Macluumaadka aad soo jeedisay intii lagu jiray codsigaagaii hore lama tixgelin doono. Si kastaba ha ahaatee codsigaagii hore lama baadhi doono.

## WAA MAXAY HABRAACU?

Markaad wargeliso maamulka in aad mar kale codsanayso ilaalin caalami ah (taas oo loo yaqaan codsi dambe), waxaa jiri doona dhowr tallaabo oo loo maro habraacaas.

**Tallaabada 1aad. Codsigaaga waa in la diwaangaliyaa oo la diraa markale**

Diwaangalinta iyo gudbinta waxa ku jira dhinacyadan soo socda.



Farahaaga ayaa la qaadi doonaa.



Sawirkaada ayaa la qaadi doonaa.




Waxaa lagu weydiin doonaa inaad soo bandhigto dhammaan dhukumantiyadaada aqoonsiga iyo kuwa cusub, safarka, iyo dhukumantiyada kale ee khuseeya ee aad haysato.




Waxa lagu weydiin doonaa inaad bixiso faahfaahinta halka lagaala soo xidhiidhayo (cinwaanka, lambarka taleefanka iyo cinwaanka iimaylka).



Waxaa lagu weydiin doonaa su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga iyo wax kasta oo u nugul si loo ogaado haddii aad u baahan tahay taageero gaar ah



Adiga iyo alaabtaada gaarka ah waa la baadhi karaa. Hantidaada gaarka ah waxay ahaanaysaa mid adiga kuu gaar ah waxaana laguu soo celin doonaa, marka laga reebo hantida loo arko mid khatar ah.



Waxa lagu weydiin doon inaad

- bixiso xogtaada gaarka ah iyo macluumaadka ku saabsan xubnaha qoyskaaga ee ku nool dalkan ama waddan kale oo ka tirsan EU+ (haddii ay jiraan);
- sharaxdo sababaha aad u samaynayso codsiga dambe.






Waxa lagu weydiin doonaa inaad soo gudbiso kuwan soo socda.

• Inaad soo gudbiso dhammaan macluumaadka iyo dhukumantiyada la heli karo ee taageeraya codsigaaga. Kuwan waxa kamid ah waxyaabaha cusub ee ku salaysan sababta aad u samaysay codsiga dambe. Shayo cusub oo aad soo gudbiso waxay noqon karaan xaqiiqooyin cusub kuwaasoo soo bandhigaya inaad u baahan tahay ilaalin caalami ah.

• Ka jawaab su'aalaha la xidhiidha codsiyadii hore ee aad u gudbisay ilaalinta caalamiga ah.



Macluumaad kasta oo aad la wadaagto maamulka waxay ahaan doonaan kuwo sir ah. Macluumaadkan lalama wadaagi doono kuwii aad kasoo carartay.

## WAA HALKEE GOOBTA IYO GOORTA AY KA DHICI DOONTO DIIWAANGELINTA IYO GUDBINTA CODSIGAAGU?

Codsigaaga ilaalada caalamiga ah waxa lagu diwaangalin doonaa oo gudbin doonaa  Xarunta Baaritaanka Citywest. Tani waa inay dhacdo ugu yaraan inta lagu jiro 10 maalmood oo ah samaynta ama dhammaadka baadhista.

Marka codsigaaga la diiwaan geliyo, waa inaad ku xareysaa Xarunta Baaritaanka Citywest taariikhda iyo waqtiga laguu soo sheegi doono inta lagu jiro diiwaangelinta.

Furitaanka codsigaagu waa inuu dhacaa ugu yaraan 21 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda diiwaangelinta codsigaaga.

Aad ayey muhiim u tahay inaad gudbiso codsigaaga. Haddii aad ku guuldareysato inaad gudbiso codsigaaga, waxaa loo tixgelin doonaa in laga noqday, haddii aan sababta guuldaradani aysan ahayn mid ka baxsan xakamayntaada. Taas macnaheedu waa inaad waayi doonto heerkaaga codsade ahaan, xuquuqdaada taageerada iyo adeegyada, iyo xuquuqda aad ku joogi karto dalkan.





Diiwaangelinta ka dib, waxaad heli doontaa dukumeenti rasmi ah oo sheegaya in codsigaagu la sameeyay oo la diiwaan geliyay. Marka aad gudbiso codsigaaga, waxaad heli doontaa dukumeenti rasmi ah oo dijitaal ah oo sheegaya inaad tahay codsade magangalyo caalami ah. Dukumeentigan waxaa loo yaqaan Kaarka Codsadaha Ilaalinta Caalamiga ah waxaana lagu kaydin karaa taleefankaaga. Waa inaad mar walba la socotaa.

## Tallaabada 2aad. Baadhista hordhaca ah ee codsigaaga



Marka codsigaaga la gudbiyo, tallaabada xigta waa **baadhitaanka hordhaca ah ee codsigaaga.**

**Inta lagu jiro baadhitaanka hordhaca ah, maamulku waxay qiimeyn doonaan haddii waxyaabaha aad soo gudbisay ay dhab ahaantii yihiin kuwo cusub iyo haddii waxyaabahan ay suurta gal tahay inay beddelaan natiijada codsigaaga hore ee la diiday.**




Inta lagu jiro baadhitaanka hordhaca ah, waxaa lagugu casuumayaa inaad ka qayb gasho waraysi. Haddii aan lagugu casumin waraysi, baadhitaanka hordhaca ah wuxuu ku saleysnaan doonaa kaliya waxyaabaha lagu soo gudbiyey faylka.

Natiijada baadhitaanka hordhaca ah, codsigaaga waxaa loo tixgelin karaa mid ka mid ah:

- **la aqbali karo,** ama
- **aan la aqbali karin**.

Haddii codsigaagu **uu yahay mid la aqbali karo, codsigaaga waxa la baadhi doonaa in badan**. Tani waxay ka dhigan tahay inaad raaci doonto isla tallaabooyinka sida habraaca caadiga ah ee magangalyada.

Haddii codsigaaga **aan la aqbali karin, lama sii baadhayo, habraacuna wuu dhammaan doonaa**. Maamulku waxay kugu wargelin doonaan sababaha codsigaaga loogu arkay mid aan la aqbali karin. Waxa lagugu wargalin doonaa go'aanka hab qoraal ah. Haddii aanad ku qanacsanayn go'aanka, waxaad qaadan kartaa racfaan ka dhan ah. Waxaad codsan kartaa lataliye sharci (qareen) oo bilaash ah si uu kaaga caawiyo racfaanka.




Codsigaaga waa **la aqbali karaa** haddii aad soo gudbiso **waxyaabo cusub** oo codsigaaga ku jira, **kuwaas oo muujinaya inaad u baahan tahay ilaalin caalami ah.**

Codsigaaga waa mid **aan la aqbali karin** haddii aadan soo gudbin waxyaabo cusub oo muujinaya inaad u baahan tahay ilaalin caalami ah.

**Haddii codsigaaga uu noqdo mid la aqbali karo, tallaabooyinka soo socda ayaa lagu dabaqi doonaa.**

## Tallaabada 3aad. Baadhitaanka codsiga ee ku saleysan xaqiiqooyinka

Haddii codsigaaga la aqbali karo, maamulku waxay baadhayaan sababaha aad ugu codsanayso ilaalinta caalamiga ah iyo sababta aadan ugu laaban doonin wadankaaga hooyo (taas waxaa loo yaqaan baadhitaanka ku saleysan xaqiiqooyinka). Haddii codsigaaga la aqbali karo, waxa uu raaci doonaa isla tallaabooyinka sida habraaca caadiga ah ee magangalyada. Si kastaba ha ahaatee, waqtiga lagu baarayo codsigaaga dambe waxaa laga yaabaa in la dedejiyo.



Waxaa lagugu martiqaadayaa waraysi shaqsi ah, haddii aan masuuliyiintu si toos ah u gaadhi karin go’aan wanaagsan iyadoo lagu saleynayo waxyaabaha ku jira faylkaaga.

### BAADHISTA CAAFIMAAD



Maamulku waxay kuu sheegi karaan inaad marto baadhitaan caafimaad oo ku saabsan calaamadaha dhibaatooyin hore ama dhaawac culus. Baadhistu waa bilaash oo waxa lagu weydiin doonaa uun ogolaanshahaaga. Waxaa lagugu wargelin doonaa natiijooyinka baadhitaanka, kuwaasoo lagu tixgelin doono qiimaynta codsigaaga Haddii maamulu aanu codsan baadhitaan, adiguna waxaad codsan kartaa baadhitaanka adiga oo kharashka iska bixiya. Baaritaanka aad adigu codsatay kama hor istaagayo hay'addu inay sii waddo go'aankeeda.

## Tallaabada 4aad. Go'aanka ku saabsan codsigaaga



Go'aan qoraal ah ayaa lagu soo diri doonaa iyada oo loo marayo akoonkaaga elegtarooniga ah ee ku yaal Xariirka Ilaalinta Caalamiga ah, ama boostada ama iimaylka adiga ama lataliyahaaga sharci, haddii aad mid leedahay. Natiijooyinka go'aanka waxaa lagugu wargelin doonaa luqad aad fahmi karto.

Haddii go'aanku diidmo, sababaha waxaa lagu sharxi doonaa go'aanka waxaana lagu soo saari doonaa go'aan aad ku laabanayso waddankaaga.



### SUURTOGALNIMADA RACFAANKA

Haddii aanad ku qanacsanayn go'aanka waxaad qaadan kartaa racfaan. Taas macnaheedu waxa weeyi Maxkamadda Racfaanka Magangelyada iyo Soo Celinta (TARA) ayaa dib u eegi doonta go'aanka. Waxaad codsan kartaa lataliye sharci oo bilaash ah si uu kaaga caawiyo racfaanka.

## WAA MAXAY XUQUUQAHAAGU?

### XAQA AAD U LEEDAHAY INAAD JOOGTO OO AAD HESHO ADEEGYADA TAAGEERADA IYO ADEEGYADA

Haddii uu yahay codsigaaga dambe ee ugu horreeyaY, guud ahaan waxaa laguu oggol yahay inaad ku sii nagaato dalkan ilaa baadhitaanka codsigaaga la soo gabagabeeyo.

**Waxaa laga yaabaa in aan laguu oggolaan inaad ku sii nagaato inta lagu jiro baadhitaanka codsigaaga** haddii:

- Haddii uu yahay codsigaaga labaad ama codsi dambe oo dheeraad ah; ama
- Waxaad codsatay ilaalin caalami ah kaliya si aad u dib u dhigto ka saaristaada degdega ah ee dalkan.

**Waxaa laga yaabaa in aan laguu oggolaan inaad ku sii nagaato inta lagu jiro habraacaaga racfaanka**. Xaaladdan, maamulku waxay kugu wargelin doonaan sababaha, iyo haddii aad codsan karto in laguu oggolaado inaad ku sii nagaato inta lagu jiro habraaca racfaanka, iyo sida loo sameeyo.

Inta aad ku sugan tahay, waxaad heli doontaa **taageero iyo adeegyo soo dhaweyn ah**; si kastaba ha ahaatee, adeegyadaasi waxaa laga yaabaa **inay xaddidan yihiin** iyadoo lagu saleynayo go’aan shaqsiyeed oo uu gaadho maamulka ay khuseyso. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad oo ku saabsan taageerada
soo-dhawaynta iyo adeegyada aad heli doonto buug-yaraha gooni ah.





## WAXAAD XAQ U LEEDAHAY INAAD HESHO TURJUMAAD



Haddii aanad hadli karin Ingiriisiga, Turjumaan ayaa kaa caawin doona inaad la xidhiidho maamulka inta lagu jiro diiwaangelinta iyo soo gudbinta codsigaaga iyo sidoo kale inta lagu jiro wareysigaaga gaarka ah. Turjumaanku waa bilaash.


## WAXAAD CODSAN KARTAA TURJUMAAN IYO WARAYSTE LAB AMA DHEDIG AH MARKAAD GALAYSO WARAYSIYADA GAARKA AH, HADDII TANI AY KAA CAAWINAYSO INAAD SI BUUXDA U SHARAXDO NAFTAADA WAXYAABAHA KU SAABSAN



Iyadoo ku xidhan sababahaaga iyo haddii ay jirto fursad, codsigaaga waa la fulin doonaa.

## WAXAAD XAQ U LEEDAHAY IN LAGU OGEYSIIYO OO AAD CODSATO LATALIN SHARCI OO BILAASH AH

Waxaad codsan kartaa latalin sharci oo bilaash ah inta lagu jiro habraaca magangalyada.



Si kastaba ha ahaatee, **waxaa laga yaabaa inaadan xaq u yeelan talo sharci oo bilaash ah haddii:**

- aad soo gudbisay codsigaaga dambe kaliya si aad u 'joojiso' habraaca oo aad dib usoo noqoto, ama
- kani waa codsigaaga labaad (ama codsi dambe oo dheeraad ah).

Waxaad ka codsan kartaa macluumaad iyo latalin sharci Xarunta Shirarka Citywest ee Guddiga Gargaarka Sharciga Adeegga La-talinta Citywest

## WAXAAD LA TASHAN KARTAA LATALIYE SHARCI (QAREEN) [ADIGOO ISTICMAALAYA KHARASHKAAGA]

Wakiilka sharciga waa qof ku siinaya talo sharci ama wakiil shaqsiyeed markaad la macaamilayso hay'adaha. Waa xuquuqdaada inaad la tashato la-taliye sharci marxalad kasta oo ka mid ah nidaamka magangalyada adiga oo bixinaya kharashkaaga.



Waxaad ka codsan kartaa wakiil sharci Guddiga Gargaarka Sharciga. Wakiil sharci ayaa laguu magacaabi doonaa lacag la'aan, wuxuuna ku siin karaa talo sharci ka hor wareysigaaga, iyadoo lagu siinayo talo ku saabsan arrin kasta oo soo baxda inta lagu jiro hawsha.

Haddii aad hesho go'aan diidmo ah oo aad rabto inaad racfaan qaadato, wakiilka sharcigu wuxuu kaa caawin doonaa inaad racfaan qaadato, u diyaargarowga racfaankaaga, wuxuuna ka qayb geli doonaa dhageysiga racfaanka isagoo ku matalaya halkaas oo uu ka socdo dhageysi afka ah.

Haddii aad doorbideyso inaad doorato wakiil sharci, la wadaag faahfaahinta xiriirka hay'adaha sida ugu dhakhsaha badan. si ay ula socodsiiyaan codsigaaga.

## WAAD LA XIDHIIDHI KARTAA HAY'ADDA QARAMADA MIDOOBAY EE QAXOOTIGA (UNHCR) AMA HAY'ADO KALE

Waxaad ogeysiin kartaa oo la xidhiidhi kartaa UNHCR ama hay'adaha la shaqeeya tallaabo kasta oo ka mid ah habraaca magangalyada.



UNHCR waxay ilaalisaa danaha iyo xuquuqda dadka codsanaya magangalyada iyo qaxootiga. UNHCR ama hay'adaha la shaqeeya sidoo kale waxay bixiyaan macluumaad iyo caawimaad loogu talagalay dadka codsanaya magangalyada.

Faahfaahinta halka lagala xidhiidhayo UNHCR iyo sidoo kale macluumaadka ku saabsan habraaca magangalyada waxa laga heli karaa wabsaytka UNHCR. https://help.unhcr.org/.

Waxaad sidoo kale la xidhiidhi kartaa hay'ad kasta oo bixisa talo sharci ama latalin kale oo loogu talagalay codsadayaasha.

# WAA MAXAY WAAJIBAADKAAGU?

## RAAC SHARCIYADA wadankaN



## JOOG wadanka AAD KA CODSATAY ILAALINTA CAALAMIGA AH




Ha isku dayin inaad aado waddan kale oo EU+ ah ama Boqortooyada Midowday (oo ay ku jirto Waqooyiga Ireland).

Waxaa laguu ogol yahay oo keliya inaad u safarto waddan kale oo EU+ ah haddii ay mas'uuliyiintu ku siiyaan oggolaansho inaad sidaas sameyso.

## HUBI IN MAAMULKU KU HELI KARAAN IYO INAAD ILAALISO WAKHTIYADA BALLAMAHA




Waa inaad timaadaa dhammaan ballamaha gaarka ah markasta oo ay kaa codsadan maamulku. Waa inaad halkaa timaadaa wakhtiga loogu talagalay. Haddii aadan ka soo qayb geli karin ballan sabab macquul ah awgeed, si degdeg ah u wargeli maamulka oo sharax sababta.



## SI DHAMMAYSTIRAN ULA SHAQEEE MAAMULKA

Marka lagaa codsado, waa inaad samaysaa kuwan soo socda.

- Bixi faahfaahintaada shaqsiga ah, dhukumantiyada iyo macluumaadka kale ee khuseeya si loo taageero codsigaaga.




- Bixi dhukumentiyada aqoonsiga. Haddii aanad haysan, sharax sababta.





- Haddii faraha iyo sawiro lagaa qaaday.





- Gudbi codsigaaga wakhtiga iyo goobta loogu talagalay.
- Kaalay waraysiga gaarka ah oo ka jawaab su'aalaha inta lagu jiro waraysiga.



- Ogolow in lagu baadho iyo alaabahaaga la baadho, haddi maamulku codsado inay sidaa sameeyaan. Baadhitaan waxa la samayn doonaa kaliya marka loo baahdo oo ay caddayn u jirto. Maamulu waxay kuu sharixi doonaan sababaha codsiga loo samaynayo. Baadhitaanka waxa fulin doona shaqsi kula jinsi ah waxaana loo samayn doona nidaam sharaftaada la ixtiraamayo.

## SHEEG RUNTA



Waxaad sheegtaa waxa uu aad muhiim ugu yahay sumcada codsigaaga. Taasi waa sababta aad ugu baahan tahay inaad daacad noqoto oo aad si buuxda oo sax ah u bixiso macluumaadkaaga ku saabsan aqoonsigaaga, qoyskaaga, dalka aad ka timid, iyo sababaha aad u codsanayso ilaalin caalami ah.

Waxaa dhici karta inaadan xasuusan wax walba, sidaa darteedna waxaa dhici karta inaadan ka jawaabi karin dhammaan su'aalaha. Haddii sidaasi dhacdo, ha samaynin jawaabaha laakiin sharax inaanad xasuusan.

## BIXI FAAHFAAHINTA SAXDA AH EE HALKA LAGAALA SOO XIDHIIDHAYO EE LAGAA HELI KARO



Maamulku waa inay awoodaan inay ku helaan marka laga hadlayo codsigaaga ilaalinta caalamiga ah.

Haddii cinwaankaaga, iimaylka ama taleefanka aad baddesho, wargali maamulka isla markiiba.

Waxaad maamulka ku wargelin kartaa wixii isbeddel ah emayl ahaan contact@ipo.gov.ie.

**Xasuusnow, waa inaanad ka tagin Ireland inta codsigaaga la baadhayo**

Haddii lagu dejiyay xarun hoy, waa inaadan meel kale u guurin adigoon fasax ka haysan maamulka.

## SOO GUDBI DHAMMAAN MACLUUMAADKA IYO DHUKUMENTIYADA TAAGEERAYADA CODSIGAAGA

Waxaa dhici karta in aan laguugu yeeri doonin wareysi shaqsiyeed iyo in habraacu uu noqon doono mid aad u gaaban, oo qaadan doona dhowr maalmood ama xitaa dhowr saacadood oo keliya. Sidaa darteed, waa muhiim inaad u sheegto mas'uuliyiinta iyadoon dib loo dhigin dhammaan sababaha iyo qodobbada cusub ee aad mar kale u codsanayso.


Waa inaad soo bandhigtaa dukumentiyada asalka ah, meel kasta oo ay suurtagal tahay. Waa inaadan soo gudbin dukumenti been abuur ah.




Waa inaad soo gudbisaa dhammaan macluumaadka iyo dukumentiyada sida ugu dhakhsaha badan marka aad buuxinayso codsigaaga. Haddii aadan haysan dukumeentiyada isla markiiba, waa inaad u soo gudbisaa sida ugu dhaqsaha badan, adoo isticmaalaya akoonkaaga elegtarooniga ah ee Xariirka Ilaalinta Caalamiga ah ama iimayl ahaan contact@ipo.gov.ie.

# WAA MAXAY CAWAAQIBKA KA DHALAN KARA HADDII AANAD KASOO BIXIN WAAJIBAADKAAS?

## HABRAACAAGA MAGANGALYO WAA LA JOOJIN DOONAA




Codsigaaga waxa loo tixgelin doonaa **mid la joojiyay ama la diiday**. Tani waxay ka dhigan tahay inaad waayi karto xaaladdaada codsade ilaalinta caalamiga ah iyo dhammaan xuquuqaha la xidhiidha.

Tani waxay dhacaysaa haddii aad diido:

- inaad bixiso macluumaad marka lagaa codsado
- in faraha iyo sawiro lagaa qaado
- inaad bixiso cinwaankaaga
- inaad ka jawaabto su'aalaha inta lagu jiro waraysigaaga gaarka ah, haddii ay jiraan

Waxa sidoo kale dhici doona haddii:

- aanad gudbin codsigaaga wakhtiga loogu talagalay iyadoo aanu jirin sabab macquul ah
- aadan ka soo qayb galin wareysiga shaqsiyeed adoon haysan sabab dhab ah.
- aadan u soo wargelin maamulka marka lagaa codsado inaad sidaas sameyso.
- aadan ku sii nagaan goobta lagugu waajibiyay inaad joogto
- aysan kula soo xidhiidhi karin maamulka
- aad ka baxdo wadanka.

Waxaad sidoo kale go’aansan kartaa inaad ka noqoto codsigaaga wakhti kasta inta lagu jiro habka magangalyada, tusaale ahaan, sababtoo ah waxaad go’aansatay inaad dalkaga ku laabato. Kiiskan oo kale, waxaad waayi doontaa xaaladdaada codsade ilaalinta caalamiga ah.

## NOOCA TAAGEERADA SOO-DHAWAYNTA IYO ADEEGYADA QAAR WAA LA DHIMI KARAA AMA LA JOOJIN KARAA



Xaaladaha qaarkood, maamulku waxay go'aamin karaan in la yareeyo ama la joojiyo nooc kamid ah taageerada ama adeegyada qaar. Maamulka ayaa kugu wargalin doona go'aanada noocaas ah hab qoraal ah kadib markay qiimeeyaan xaaladaada.

Waxaad raadin kartaa macluumaad dheeraad ah buug-yare ka duwan.

## CODSIGAAGA WAXA LAGA YAABA IN SI XUN LOO SAAMEEYO

Haddii aad bixiso macluumaad marin-habaab ah ama been ah oo ku saabsan aqoonsigaaga ama codsigaaga, ama haddii aad baabi’iso ama aad been-abuurto dhukumanti, tani waxay saameyn xun ku yeelan kartaa codsigaaga, tusaale sida soo socota.



- Codsigaaga waa la diidi karaa oo waxa laga yaabaa inaanad helin ilaalin caalami ah.

- Waxaa suurta gal ah in codsigaaga lagu baaro habraaca magangelyada ee xuduudka (haddii ay taasi dhacdo, waxaad heli doontaa macluumaad gaar ah oo ku saabsan habraaca).

Ilaalinta caalamiga ah sidoo kale lagaa qaadi karaa haddii maamulku ogaadaan goor dambe inaad runta ka been sheegtay inta lagu jiray habka magangalyada.

## WAXAAD HELI KARTAA TAAGEERO GAAR AH HADDII AAD U BAAHATO

Waa inaad maamulka si degdeg ah u wargelisaa haddii aad u baahan tahay taageero gaar ah. Baahiyadani waxay ka dhalan karaan xaalado kala duwan sida uurka, cudurka, ama waayo-aragnimooyinka dhibaatooyinka nafsi, jidheed ama galmo.

Maamulku waxay qiimayn doonaan xaaladdaada, waxayna bixiin karaan taageero dheeraad ah si loo fududeeyo ka qaybgalkaaga habka magangalyada. Tusaale ahaan, waxay shaqaale takhasus leh u qoondeyn karaan kiiskaaga



## MAXAA DHICI DOONA HADDII AAD RABTO INAAD KU LAABATO wadankaAGA?

Wakhti kasta inta lagu jiro habraaca magangalyada, waxaad go'aansan kartaa inaad si iskaa ah ugu laabato:

- wadankaaga ama
- wadanka aad soo dhaaftay ama waddan kale oo saddexaad, haddii aad xaq u leedahay inaad aado.

Waxaad ka heli kartaa caawimo duulimaadyada, dukumentiyada safarka iyo qabanqaabada safarka. Waxa kale oo aad heli kartaa taageero dhaqaale, iyadoo ku xiran xaq u yeelashada.

Haddii aad go’aansato inaad si iskaa ah ugu laabato, habka magangalyadaada waa la joojin doonaa oo waa mana yeelan doontid xaqa aad ku joogto Ireland.

Haddii aad doonayso inaad si iskaa u ah u laabato, la xidhiidh maamulka ee Xarunta Hoyga Citywest adoo iimayl u diraya voluntaryreturns@justice.ie ama taleefanka +353 87 403 1651. Waxaad heli kartaa -macluumaad iyo sidoo kale caawimo ku saabsan soo noqoshadaada badbaadada leh oo sharciga ah.



# XAQIIJINTA HELITAANKA MACLUUMAADKA

Waxaa lagaa codsan doonaa inaad xaqiijiso inaad heshay macluumaadka ku jira buug-yarahan iyada oo loo marayo akoonkaaga elektaroonigga ah ee ku yaal Bogga Ilaalinta Caalamiga ah.

Haddii aadan wax fahmin ama haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah, waad weydiin kartaa mar walba.

Buug-yarahaan waxa loogu talagalay keliya ujeeddooyin macluumaad ah. Isagu ma abuuro xuquuq iyo waajibaad midna. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalkan, waxaana EUAA oo keliya u oggolaan kara in la daabaco ama wax laga beddelo buug-yarahan, taas oo loogu talagalay dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub. EUAA mas'uul kama aha saxnaanta, nuxurka, dhammaystirka, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay ku dareen dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub ama cid kale oo mas'uul ah. EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas'uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025